



Bebtelovimab Xaashida Xaqiiqada

(La cusboonaysiiyey 3-2-2022)

S: Waa maxay Bebtelovimab?

Bebtelovimab waa daawo loogu talagalay in lagu daaweeyo cudurka COVID-19 ee fudud-ilaa-dhexdhexaadka. Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka ee Mareykanka (FDA) ayaa markii ugu horreysay oggolaatay isticmaalkeeda Febraayo 2022.

S: Yaa waaye cida qaadaneyso Bebtelovimab?

Bebtelovimab waxaa loogu talagalay dadka leh calaamadaha fudud ilaa dhexdhexaadka ah ee COVID-19 kuwaas oo:

- Da'doodu tahay 12 sano jir iyo wixii ka weyn kuwaas oo miisaankoodu yahay ugu yaraan 88 rodol. (40 kg)
- Laga helay cudurka COVID-19
- Halis sare ugu jiraan COVID-19 daran
- Aan heli karin xulashooyinka kale ee daawada ay oggolaatay FDA.

S: Sidee ayaa loo qaataa?

Bebtelovimab waxa la isku siiyaa cirbad laga qaato xididka

S: Waa maxay waxyeelada suurtagalka ah ee Bebtelovimab ay leedahay?

Waxyeelooyinka daawadan waxaa ka mid ah:

- Dhiig, nabar, xanuun, iyo barar meesha dawada laga qaatay
- Falcelinta xasaasiyadda ee ka dhanka ah maaddooyinka daawada ku jira

S: Waa maxay waxa aan u sheegayo bixiyahayga daryeelka caafimaadka ka hor inta aanan qaadan Bebtelovimab?

U sheeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad:

- Qabtid wax xasaasiyad ah
- Uur leedahay ama aad qorshaynayso inaad uur yeelato
- Naas nuujinayso ama aad qorshaynayso inaad naas nuujiso
- Qabtid xanuun halis ah

- Qaadato wax daawooyin ah (daawoyinka dhakhtarka kuu qoro, daawooyinka farmashiyaha laga iibsado, kabitaanka daawa dhireedka, iwm.)

S: Waa maxay waxa Bebtelovimab AAN loo isticmaali karin?

Bebtelovimab LOOMA isticmaali karo:

- Daawaynta hore ee bukaanada u baahan isbitaal dhigista sababo la xiriira cudurka COVID-19 ee daran
- Bukaanada ugu baahan ogsijiinta sababo la xiriira COVID-19
- Kahortagga cudurka COVID-19

Macluumaad dheeraad ah:

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xiriir bixiyahaaga daryeelka caafimaadka, booqo mareegta Bebtelovimab ee ah <http://www.lillyantibody.com/bebtelovimab> ama wac 1 (855) 545-5921

Helida dukumintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay kugu siin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida turjumaada, daabacaada ballaaran, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Qaybta Isgaarsiinta COVID-19 1-971673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.